



# State-Approved Training Program (Barnaamijka Tobobarka Gobolka Ansixiyay) ee DCYF

## *Waa maxay Barnaamijka Tobobarka Gobolka Ansixiyay ee DCYF?*

Barnaamijka tobobarka gobolku ansixiyay ee Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarta, iyo Qoysaska, DCYF) Gobolka Washington waxa uu ka taageeraa korniinka xirfadlayaasha aqoontooda iyo xirfadahooda si ay markaa u hormariyaan oo ay u joogteeyaan nidaamyada tayada ee barnaamijyada u adeega caruurta, dhalinyarta, iyo qoysaska. Tobobarka uu ansixiyay gobolku waxa uu leeyhaay tobobarayaal hibo leh oo ay ka go'an tahay oo ka socda hay'ada bulshada ku salaysan ee gobolka, onleyn ahaan, ku barashada shaqada ee madaxa banaan, ama isku darka qaababkan.

## **Tobobaraha La Ansixiyay**

Tobobarayaashu waxay leeyihiin saamayn wayn oo aqoonta, xirfadlayaasha iyo awoodaha xirfadlayaasha ah. Marka la eego saamaynta tobobarayaasha ay leeyihiin, waxa in aanu xaqiijiyaa inay bixin karaan khibrad waxbarasho oo aad u tayo saraysa. Si ay ugu bixiyaan waxbarashada u qalanka adeega dhaxdiisa, tobobarayaashu maraan nidaam arji oo ay ku sheegaan khibradooda iyo taariikhhooda waxbarasho iyo sidoo kale fududaynta waxbarashada dadka waawayn. Macluumaadkan waxa uu naga caawiyaan in aanu go'aansano aaga xogta iyo heerarka ay tobobari doonaan.

## **Ansixinta Xirfadlayaasha**

Mararka qaar, dalbayaasha tobobaruhu ma soo bandhigaan aqoon wanaagsan oo dhamaan heerarka tobobarka ah mudada uu socdo nidaamka arjigu. Waxay si kumeel gaadh ah u aqbali doonaan tobobarayasha gobolku ansixiyay mudo lix bilood ah. Aqbalaadani waxay u saamaxaysaa tobobarayaasha inay ka qayb galaan hormarka xirfadeed ee bartilmaameedsan si loo dhiso aqoonta iyo xirfadaha.

## **Shaqaalaysiinta iyo Ku Haynta Shaqada ee Tobobarayaasha Kala Duwan**

Mid kamid ah mudnaanaha barnaamijkeenu waxaa weeye in la dhiso shaqaale tobore ah oo ay ka muuqato kala duwanaanshaha luuqada iyo dhaqanka ee bixiyuhu u adeegayo. Waxa aanu iskaashi la samaysanaynaa hay'adaha naga taageeri doona shaqaalaysiinta tobobarayaasha kala duwan ee gobolka oo dhan.



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## Xaqiijinta Bixinta Tobobarka Tayada Sare

Waxa aanu doonaynaa in aanu xaqiijino in tobobarayaasheenu ay bixiyaan fursado waxbarasho oo tayo sare oo xirfadlayaasha ah. Si taas loo sameeyo, waxa aanu si qori tuur ah u kormeerna tobobarayaasha si aanu u aragno hadii ay buuxiyeen Heerarka Tobobarka. Wixii macluumaad dheeraad ah, faldan akhri baahinta *Wax Badan Ka Oggow Heerarka Tobobaraha*(EPS\_0060) oo waxaa laga heleyaa onleyn ahaan [www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS\\_0060.pdf](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0060.pdf) Kormeerka tobobaruha waxay noo saamaxaysaa in aanu siino tobobarayaasha faalo shakhsi ahaaneed oo ku saabsan hormarkiisa xirfadeed, in lala socdo sida nidaamka hormarka xirfadeed uu yahay wax qabadkiisu, iyo in laga caawiyo ka jawaabida baahiyaha barashada tobobaraha. Waxa aanu sidoo kale akhri doonaa macluumaadka tobobarka ee la gelinayo duwaankeena hormarka xirfadeed si markaa aanu u aragno aragtiyada isticmaalaya maadaama oo ay la xidhiidhaan tobobarka.

## Hormarka Xirfadeed ee Tobobaraha

Tobobarayaasha waa inay dhamaystirtaan 15 saacadood oo adeegyo ah oo qayb ka ah shuruudaha hormarka xirfadeed. Waxa aanu samayn karaan taas iyada oo dhiga kaydhooda aqooneed ee aagaga lagu tobobaray ama iyada oo ka qayb galaya tobobar waafaqsan Heerarka Tobobaraha. Dhamaan tobobarayaasha waa inay xaqiijiyaan in shan saacadood sanadkii ay u qoondeeyaan qaababka barasho ee la dagaalanka eexda iyo la dagaalanka cunsuriyada.



## Hormarinta Tayada ee Joogtada ah

Waxaa naga goan in aanu si joogto ah u wacyi gelino oo aanu ual shaqayno dadaalada u sahlaya tobobarayaasheena, maamualayaasheena barnaamijka tobobarka, iyo ka qayb galka tobobarka si loogu sheego hormarka barnaamijka iyo dib u eegitaanka. Yoolkeena aqoon is waydaarsigu waxaa weeye inuu cadaado wixii ku saabsan faalada ay ka heleyaan dadaalaneena wacyi gelinta iyo sida faaladu u saamaynayo barnaamijkeena.

Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xidhiidh Kooxda Hormarka Xirfadeed [training@dcyf.wa.gov](mailto:training@dcyf.wa.gov).